



15 fasalada AP. 7 dariiqooyinka xirfadaha-farsamo. 14 ciyaarood. 29 naadi. Hogaanka Culimada, cilmiga luqadda kambiyuutarka, qalabka iswada 'robotics', injineernimada, cilmiga dambi baarista, sayniska caafimaadka/bayolajiga, fanka, muusikada, riwaayada, ku dhex darka Isbaanishka... Ku soo dhowoow meesha uu deriskaaga wax ka bilaabaan.

Dugsiga Sare ee Madison waa bulsho soo dhoweyn leh halkaasi oo ardayda asal ahaan meelaha kala duwan ka soo jeeda ay wax ku bartaan, ku kobcaan isla markaana ku bararaan iyada oo ay hoggaaminayaan macalimiin, khibrad leh, oo dareen xoog leh qaba.

GUUDMARKA

Meelaynta Horumarsan ee shaqada koorso, bixinta Sayniska Teknooloojiyada iyo Xisaabta Injineernimo (STEM) oo xoogan, tababarka u diyaar ahaanshaha-kulliyada ah iyada oo la isticmaalayo barnaamijka Horumarka La Adeegsanayo Aayo Ka Tashiga Qofka (AVID), iyo ka qaybqaadashada doorashada kala duwan oo lagu taageerayo dhaqanka u diyaar garoowga-kulliyada oo wax sare la filayo.

Barnaamijka Hogaanka Culimada Madison wuxuu furayaa koorso shaqo AP oo loogu talagalay arday badan. Illooyin waxbarid oo cusub, barnaamijka tababarka Hore U socodka, xarun caafimaad oo goobta ku taala, iyo barnaamijka Dugsiga Bulshada SUN waxay taageeraan dhammaan ardayda.



Madison waxay ka mid tahay meesha ugu badan ee ay arday kala duwan ku nool yihiin gobolka, taasi oo nolasha dhismaha dugsiga ka dhigaysa mid qani ah, waayo-aragnimo maskaxda kordhinaysa oo caawimaad ka geysata in ardayda loo diyaariyo nolol dugsiga sare ka dib.

KU SOO DHOWOOW CAALAMKA

Ardayda dhigata Madison waxay ku hadlaan in ka badan 30 luqadood, laga bilaabo luqadaha Isbaanishka iyo Soomaaliga illaa Thai iyo Turkiga. Dhaqaalaha sii kordhaya ee caalamka, ardayda Madison waxay hal tallaabo ka horeeyaan marka ay noqoto soo gaadhista aragtida kala duwan iyo dhaqamada. Kala duwanaanshaha ka jira dugsigu wuxuu dhiirigelinayaa dhaqan wax la iska weydiyo isla markaana loo wada dhan yahay. Ardaydu waxay awoodaan in ay horumaraan, waxayna helaan soo dhaweyn gacmo furan leh, oo dadnimo leh.

KOORSADA AP BIXISO

- | | |
|----------------------------------|------------------------------|
| Biology-ga | Juqraafiga Bani'aadamka |
| Xisaabta kalkulaska AB & BC | Aragtida Muusikada |
| Chemistry-ga | Physics-ka |
| Cilmiga Kambiyuutarka | Cilmi Nafsiga |
| Qoraalka Luqadda | Isbaanishka |
| Ingiriisiga | Tirakoobka |
| Suugaanta Ingiriisiga & Qoraalka | Dowladda Mareykanka |
| Sayniska Deegaanka | Taariikhda Mareykanka |
| | In badana way soo socdaan... |

SAYNIS & XISAAB

M+

SAYNISKA CAAFIMAADKA/ BAYOLAJIGA

- Mabaa'diida ku saabsan Sayniska Caafimaadka/Bayolajiga
- Nidaamyada Jirka Bani'aadamka*
- Waxqabadyada Caafimaad*
- Fikradaha Cusub ee Cilmiga Caafimaadka/Bayolajiga (Koonsada Capstone)*

* *Kasbashada dhibcaha (credit-ka) kulliyada*

M
81109
10110
11110

CILMIGA KAMBIYUUTARKA

- Hordhaca Cilmiga Kambiyuutarka
- Cilmiga Kambiyuutarka Dhexe
- Cilmiga Kambiyuutarka AP
- Naqshadaynta iyo Muuqaal u yeelida 3D
- Qalabka Iswada 'Robotics' FTC
- Naqshadaynta Sare

Mπ

XISAABAHA

- Aljebra la adeegsanayo Meelaynta Horumarsan ee Kalkulaska BC (Kalkuluska II)
- Tirakoobyada AP

MX

INJINEERNIMO

- Hordhaca Naqshadaynta Injineernimo, ay ku jiraan naqshadaynta 3D
- Elektaroonikada Lambarka ah
- Cilmiga Luqadda Kambiyuutarka

U YEERITAANKA
DHAMMAAN
MACALLIMIINTA
MUSTAQBALKA:
Koorso Cusub Oo
Lagu Magacaabo:

FASALKA MACALLIMIINTA MUSTAQBALKA



- Baro saameynta isbedelka ee uu ku yeelan karo waxbarashada bulshada degaankeena iyo caalamka
- Hel aragti iyo faham ay xudun u tahay cadaaladda bulshadu marka ay noqoto arrimaha saameeyaa waxbarashada

“Runtii aad ayaan ugu farxay markii aan maqlay wax ku saabsan fasalka injineernimada. Waan jeclahay injineernimada iyo wax naqshadaynta, fasalkuna wuxuu igu caawiyaa in aan fahmo sida aan u isticmaalayo qalabkan maadada aan dhigto” *Olivia, Fasalka 2017ka*



9 Horyaalada Gobolka, 67 P.I.L. oo horyaalnimo. Waa maxay ciyaartaadu?

CAYAARAHA



- | | | | | |
|---------------------------|------------------|-----------------|----------------------|----------------------|
| Iskaga Gudbida Waddanka | Kubbadda cagta | Lagdinta | Kubbadda softball-ka | Dhiirigelinta kooxda |
| Kubbadda baseball-ka | Kubbadda laliska | Dabaasha | Kubbadda golf-ka | Qoob ka Cayaarka |
| Kubbadda cagta Maraykanka | Kubbadda kolayga | Cayaaraha Fudud | Kubbadda tenniska | |

FANKA

Koorsooyin fanka-lagu dabakho oo kala duwan oo fiican, ay ku jiraan doorashooyinka AP ee ku saabsan Aragtida Muusikada iyo Naqshadaynta Istuudiyaha:


“Macalimiin badan oo halkan jooga waa kuwo aad wax dhiirigeliya. Waxay kaa dhigaan in aad ka fikirtid mustaqbalkaaga— si ka baxsan afartaada sanno ee dugsiga sare.”

Mustaf, qalim jabiye Garab istaag Carruurta “Ka Adkaanshaha Dhibaatooyinka” helaha deeq waxbarasho



“Waxaad la kulmeysaa dad kala duwan oo fara badan oo asal ahaan meelo kala duwan ka soo jeeda isla markaana dhaqano kala duwan leh”

Jane, Fasalka 2018ka



MES

MASRAX

- Masraxa
- Farsamada masraxa

M%

HAL ABUURKA WANAAGSAN & FANKA OO LAGU DABAKHO

- Dharka iyo Farsamooyinka Gacanta
- Dhoobada & Farsamada Farshaxanka
- Aasaaska Fanka
- Naqshadaynta Elektaroonikada ah
- Daabacaada Elektaroonikada ah

MUS

MUUSIKADA

- Koox Muusikada
- Durbaan
- Kooxda Riwaayadaha
- Kooxda Heesta
- Heesayaasha Madison
- Aragtida Muusikada AP

M

LUQADDA FANKA

- Koorsooyin Ingiriis buuxa oo kala duwan
- Suugaanta Casriga ah & Hal abuurka Wax qorida ee loogu talagalay Daabacaada
- Saxaafadda
- Habka Waxbarid ee Isbaanishka

Dugsiyada Dadweynaha Portland waa fursad wax barid iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay. 2018